# Mashruuca Hirgelinta *Sharciga Caawinta Dhimishada Ikhtiyaariga ah ee 2019*

# Xaashida Xaqiiqada - Macluumaadka Guud ee Bulshada

## Farriimaha Muhiimka ah

- Galbeedka Australia ayaa meel mariyey sharci u saamaxaya in caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah ay noqoto xulasho ay heli karaan dadka uqalma **bartamaha 2021**. Tani waa in la oggolaado muddo 18 bilood ah oo hirgelin ah.
- Waaxda Caafimaadka ayaa ka shaqaynaysa sidii ay ugu diyaar garoobi lahayd caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah ee laga heli karo Galbeedka Australia
- Waxaa jira dhinacyo badan oo lagu hubinayo in caawinta dhimashadda ikhtiyaariga ah ay ammaan tahay, la heli karo oo qofka ku xidhan.
- Waaxda Caafimaadka waxay diyaarisay Kooxda Hoggaaminta Fulinta si ay u siiso khabiir hage ah mashruuca hirgelinta.

## Waa maxay caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah?

Caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah waxay la xiriirtaa hannaan lagu helo daawada iyo u suurtagalinta qofka uqalma inuu si sharci ah u doorto qaabka iyo wakhtiga dhimashadooda.

Ereyga 'caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah' waxay xooga-saaraysaa nooca ikhtiyaarka ee ikhtiyaarka qofka iyo awoodooda adkaysi ee ay ku samayn karaan go’aankan.

## Yaa awoodi doona inuu helo caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah?

Qofku waa inuu ahaado qof weyn oo haysta dhalashada Australiya ama degganaanshaha joogtada ah isla markaana ku noolaa Galbeedka Australiya ugu yaraan 12 bilood.

Qofka waa inuu lahaadaa cudur, xanuun ama xaalad caafimaad oo horusocod leh, horumarsan oo sababi doonta geeri (isku dheelitirka jaaniska suurtogalnimada) lix bilood gudahood, ama 12 bilood haddii ay tahay xaalad neerfaha ku taal (tusaale ahaan cudurka neerfaha dareenka ka qaada maskaxda). Waa inay keenaysaa silic aan lagaga bogsan karin qaab qofku u dul-qaadan karo.

Qofku waa inuu lahaadaa awood go'aan qaadasho oo laxiriirta caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah. Waa inay u sameynayaan si iskood ah oo aan qasab ahayn. Codsigooda waa inuu ahaadaa mid waara.

## Maxaa kale ee aan u baahanahay inaan ogaado?

Tani waa xaashida xaqiiqda ee bilowga ah oo aan loogu talogalin inay bixiso macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah.

## Xageen ka heli karaa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan Sharciga *Caawinta Dhimashada ikhtiyaariga ah 2019*?

Sharcigu wuxuu ka kooban yahay faahfaahin badan oo ku saabsan cidda heli karta caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah iyo habka ay tahay in la raaco.

Macluumaad dheeri ah, iyo si aad u aragto sharciga buuxa, fadlan tag websaydka Waaxda Caafimaadka: www.health.wa.gov.au/voluntaryassisteddying

Taariikhda Soo-saarista: Juun 2020

Websaydku waxa kale oo uu leeyahay jaantus-raac kasoo tilmaamaya habka caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah iyo soo bandhigid aad daawan karo ama aad dhagaysan karto. Kuwani waa qodobbo wanaagsan oo bilow ah ee barashada wax badan..

## Maxay Waaxda Caafimaadka samaynaysaa si ay ugu diyaar garoobaan caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah?

Mashruuc ayaa ka socda Waaxda Caafimaadka si loo hubiyo in caawinta dhimashadda ikhtiyaariga ah si habboon looga hirgeliyay Galbeedka Australia.

Waa muhiim in la hubiyo in howshu ammaan tahay, habboon tahay oo sharciga la raacayo.

## Maxaa u baahan in la diyaariyo?

Waxaa jira dhinacyo badan si loo hubiyo in Galbeedka Australiya ay diyaar u tahay marka caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah ay heli karaan dadka uqalma.

Sharciga Caawinta Dhimashada Ikhtiyaariga ah ee *2019* ayaa sharraxaya qaabab badan iyo faahfaahinta, iyo hababka kala duwan ee ay tahay in la raaco. Diyaargarow ayaa loo baahan yahay si qof walba oo ku lug leh u fahmo shuruudahan si ay si sax ah ula socdaan.

Barnaamijka tababbarka ee dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha ee ka qaybqaadanaya hawsha waxay u baahan yihiin in la horumariyo, Guddiga Caawinta Dhimashada Ikhtiyaariga ah ayaa loo baahan yahay in la dejiyo iyo nidaamka IT-ga ee habbaynta iyo xog ururinta loo baahan yahay in la abuuro.

Adeegyada ayaa loo baahan yahay in la diyaariyo si dadku ay u hellaan walxaha caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah marka loo qoro.

Waxaa kale oo jiri doona Adeegga Jiheeyaha Daryeel kaas oo dadka ka caawin doona sidii ay u heli lahaayeen macluumaadka ku saabsan caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah iyo taakuleynta dadka inta hawshu socoto haddii loo baahdo.

## Yaa ka caawinaya diyaarinta?

Waaxda Caafimaadka waxay abuurtay Kooxda Hogaaminta Hirgalinta oo uu hogaaminayo Dr Scott Blackwell, oo sidoo kale ahaa Guddiga Khubarada Wasaaradda ee Caawinta Dhimashada Ikhtiyaariga ah. Kooxdani waxay ka kooban tahay wakiillo caafimaad, kalkaaliye, caafimaad iyo bulsheed. Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga heli karaa websaydka.

Inta lagu gudajiro diyaargarowga, Kooxda Hogaaminta Hirgelinta waxay la shaqayn doontaa wakiilo kale oo badan iyo daneeyayaasha si loo hubiyo inay heystaan macluumaadka saxda ah marka la samaynayo dhinacyada ugu faahfaahsan ee hirgelinta caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah ee WA.

## Goormaan heli doonaa macluumaad dheeri ah?

Sannadka soo socda waxaa diiradda lagu saari doonaa diyaargarowga fulinta. Waxannu rajaynaynaa inay jiri doonaan waxyaabo badan oo aan idinku wargelinno 2021-ka markasta oo aan u sii dhowaanno wakhtiga marka caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah ay heli doonaan dadka uqalma.

## Sideen ula socon karaa cusboonaysiinta horumarka?

Kooxda Hogaaminta Hirgelinta ayaa soo diraya cusboonaysiimo iimayl ah inta lagu jiro sannadka. Waad is qori kartaa si aad u hesho cusboonaysiintan halkan.

## Ma jiraan wax kale oo ay tahay inaan ogaado?

Waxaa jira macluumaad aad u badan oo ku saabsan hawsha keentay in caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah laga ansixiyo sharciga Galbeedka Australia iyo Warbixinta ugu Dambeysa ee Guddiga Khubbarada Waaxda ee Caawinta Dhimashada Ikhtiyaariga ah waxay bixisaa soo koobidda guud ee arrimaha la xiriira. (Fadlan xasuusnow si kastaba ha noqotee in qaybo ka mid ah sharciga ay xoogaa ka duwan yihiin talooyinka guddiga).

Waxa kale oo jira macluumaad badan oo laga heli karo intarnetka oo ku saabsan meelaha kale ee leh nooc ka mid ah caawinta dhimashada ikhtiyaariga ah oo ay ka mid tahay Victoria, Australia. Waxaad ogaan kartaa in qaar ka mid ah ka hadla macluumaadka dheeriga ah ee laxiriira caawinta dhimashadda ikhtiyaariga ah ay aad waxtar u leedahay laakiin la soco in faahfaahinta sharciyada maxalliga ah iyo hababku ay xoogaa ka duwan yihiin sharciga Galbeedka Australia.

Taariikhda Soo-saarista: Juun 2020